

## **Laba talooyin oo ka yimid hay'adda caafimaadka**

**1.Waad soo booqan kartaa xarumaha dadka da'da ah**

**2.Dadka waaweyni waa in ay joogaan guriga hadii qof qoyska ka mid ahi laga helo cudurka. Waa labadan talo waxa ay ka yimideen hay'adda caafimaadka.**

**Dadka waaweyn waa iney joogaan guriga hadey xanuunsan yihiin.**

Qofka leh calaamadaha cudurka, waa inuu isa soo baaraa. Haddii qofka cudurkii laga helo, waa in dadka la degan oo idil ay guriga ka joogaan shaqada.

Dhakhtarka u qaabilsan (baaritaanka covid-19) ayaa la xiriiyaya daka kale ee deggan guriga una sheegaya waxa laga doonayo iney sameeyaan( Hab dhaqameed). Kadib isagaa kuu qoraya warqadda cadeynta.

Qofkii shaqadiisa guriga ka joogay, waa la siinayaa bedel lacageedka mushaarkiisii.

Waana dhakhtarka kan kuu qoraya cadeyntaas.

Xataa hadii aad adiga shakhsiyani sameyso baaritaanka oo aadan dhakhtar la kulmin, waxaa jira dhakhtar u qaabilsan baaritaan kasta. Waana kan soo wacaya reerka. Markaa waa in qof walba yaqaanaa sharciga.

Gobolka kalmar oo ah kan u qaabilsan caafimaadka, wuxuu doonayaa in qofku

baaritan ka dalbado beyjka internetka ee 1177.se. Waa inaad bank-Id leedahay (Hadaadan lahayn Bank-Id wac xaruntaada caafimaadka).

Carruurta caafimaadka qaba ee dugsiyada xanaanada, kuwa hoose-dhexe fasalada 1-9. Waa inaaney guriga joogin. Qofka aan calaamadaha cudurka lahayn baa carruta geynaya soona qaadaya, kadibna guriga aadaya.

**War farxad leh- hadda xarumaha dadka da'da ah waa la booqan karaa.**

Waqtii dhib badan bay u ahayd in badanoo ka mid ah dadka da'da ah, oo lama aaney kulmi karin qaraabadooda iyo asxaabtooda midnaba. Laakiin 1-da-oktoobar wixii ka bilowda waa lasoo booqan karaa xarumahooda.

Maadaama ay weli jirto khatarta dadka da'da ah ku aadan, waa inaan si'aad ah u foojignaanaa. Waa in aynu raacnaa sharciyada gaarka ah. Marka hore waca xarunta oo weydiya sharciyadooda gaarka ah. Xarumuhu wey kala shrci duwanaan karaan.

”Qofku waa inuu xaga jirka iyo maskaxdaba ka caafimaad qabaa” sidaa waxaa yiri Anders Tegnell oo ah isu duwaha qaran ee cudurada faafa. ” Si dadku markale u kulmaan”

Intii cudurka Karoonuhu dilaacay, culimada wax baara wax badan bay ka barten cudurkan iyo sida leysaga difaacaba. Sidaa daraadeed bay Iswiidhan talaabooyinkan u qaadeysaa. Waase muhiim in qof walba mas'uuliyadiisa qaato, taxadarana.



**Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.** Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.

Kalmar kommun



facebook.com/krissamverkan.kalmar